



COVID-19

# U Diyaar Garowga Qaliinka: Baarid COVID-19

Marka aad u diyaar garoobaysid qaliinka Isbitaalka caruurta ee Minnesota, fadlan ogow in aan qaadayno tilaaboyin la xiriira amaanka oo aan ku hubinayno caafimaadka ilmahaaga sidii uu u mari lahaa qaliin amaan ah. Ilmaha u balansan qaliin in ay maraan, waa in laga baaraa COVID-19 sadex maalmood ka hor qaliinka. Baaridu waxay naga caawinaysaa go'aan ka gaaridda wakhtiga ugu fiican oo la daryeeli karo ilmahaaga. Haddii aan laga baarin ilmahaaga COVID-19, qaliinku dib ayuu u dhici doonaa.

## Isbitaalka Caruurta ee Minnesota ayaa balanka baarida kuu soo wici doona

Baarida COVID-19 waxay u baahantahay balan. Isbitaalka Caruurta ee Minnesota baa ku soo wici doona balanka baarida, kadib marka balanka qaliinka la dhigo.

Waxaan kugu dhiira galinaynaa in aad iska baartid Isbataalka Caruurta ee Minnesota barta baabuurka lagu maro oo sanka suufka la mariyo si loo hubiyo natiijooyinka in ay diwaan gashanyihiiin maalinta qaliinka.



**Saacadaha ay furantahay barta suufmarinta sanka:**  
Isniin ilaa jimce: 7:30 subaxnimo.–4 galabnimo.

- Barta suufmarinta sanka St. Paul ee bukaan socodka guura**  
233 Grand Avenue, St. Paul, MN 55102  
Waxaa laga gala baarkinka ku yaal Thompson Street.  
Raadi baska bukaan socodka guura oo yaala baarkinka.  
[View a map](#)
- Barta Suufmarinta sanka Minneapolis**  
2545 Chicago Avenue South, Minneapolis, MN 55404  
Baarkinka ku horyaal sarta Midtown Doctors [View a map](#)



## Waxyalaha aad samaynaysid markaa timaadid:

Dhigo baabuurka meelaha lambarka leh oo ay ku qoratahay "Swab Center". Wac lambarka ku yaal calaamada:

- Minneapolis: 612-813-7787
- St. Paul: 651-220-7201



## COVID-19

Qof ka mid ah shaqaalaha caafimaadka baa kuugu imaan doona baabuurka kuuna sheegi doona waxa aad samayn lahayd.

- Ha ku jiro ilmahaadu kursigiisa baabuurka, ama ha fadhiyo kursiga baabuurka hana xirnaado suunka kursiga.
- Si looga baaro COVID-19, qori dheer oo suuf afka ku leh ayaa sanka ilmaha la galin doonaa. Waxay u badantahay in uusan ilmuuhu jeclaysan doonin. U wad baabuurka meel kale oo aad ku dajin kartid ilmahaaga.
- Kadib marka laga qaado COVID-19, guriga jooga kana fiiri wax astaama COVID-19 ah si aad jiradaan uga badbaadisid naftaada, qoyskaaga iyo bulshada. [Learn more](#).

### Natijjooyinkii baarida COVID-19

Natijjooyinku in ay soo noqdaan waxay qaadanaysaa dhowr maalmood. Waa lagu soo wici doonaa, waxaana laguu sheegi doonaa waxa la samayn doono oo ku xiran natijjooyinka soo baxay.

### Ikhyaarada kale ee baarida COVID-19

Haddii aysan kuu suurto galayn in aad isku baartid isbitaalka caruurta ee Minnesota. Haddii **aadan** isku baarin Isbitaalka caruurta ee Minnesota, waa in aad keentaa nuql cadaynaya natijjada baarida maalinta qaliinka taas oo cadaynaysa in aad iska baartay COVID-19.

#### Ikhyaarada kale ee baarida

Baarida COVID-19 waxaa loo baahanyahay 3 maalmood ka hor maalinta qaliinka. Bukaan-socodyada qaarkood iyo meelaha kale oo ka baxsan Isbitaalka caruurta Minnesota waxaa suurto gal ah in aysan baarida ku dhamayn wakhtiga cayiman, ama aysan haysan qalabkii baarida COVID-19. Meelaha kale oo la isku baaro waxaa ka mid ah:

- Bukaan-Socodkaaga daryeelka caafimaadka: Weydii in aad ka dhigatid balanka baarida COVID-19 marka aad ka dhiganaysid balanka baarida guud ee ka horeeya qaliinka.
- Waxaa kale oo aadi kartaa **meel kale oo la isku baaro**. Haddii ay su'aal kaa weydiyaan baarida meesha aad weydiisatay, la xiriir dhakhtarkaaga si uu amarka baarida COVID-19 u bixiyo.
- Fadlan samee wax walba si aad u heshid baarida COVID-19 qaliinka kahor. Haddii aysan suurto gal ahayn in jawaabta baarida COVID uusan helin 3 maalmood kahor qaliinka, Bukaanka iyo qoysku **waa in ay** ka fogaadaan bulshada. Tan macnaheedu waa: Inaysan idiin imaan booqdayaal, aadin xanaanada caruurta, aadin shaqo, aadin suuqa haddii aysan ahayn muhiim, iyo sidoo kale.



## COVID-19

### fariimaha u diyaar garowga baarida COVID-19

- Haddii ay suurto gal tahay, ku koob dadka gaariga la socda darawalka iyo ilmaha la baarayo.
- Qof kasta oo baabuurka saaran waa in uu fadhiyaa kursigiisa suunkuna u xiranyahay.
- Qof kasta oo ka weyn labo sano waa in uu xirnaadaa maaskaro baabuurkana ku jiraa.
- Shaqaalaha barta baarida waxay xiranyihiiin qalab idinka ilaalinaya idinka iyo iyagaba in jirada qaadaan. [Watch this video](#) fiirso fiidiyowgaa si ilmahaagu u arko una fahmo waxa ay qabaan.



### Yaa bixinaya kharashka baarida COVID-19?

**Caymis caafimaad:** Waxa la yiraahdo CARES Act waxay waajib uga dhigaysaa baarida COVID-19 in ay bixiyaan caymisyada caafimaadku taas oo aan kharash ugu fadhiyay bukaanka. Tani waxay saamaysaa inta badan caymisyada laga haysto Minnesota. CARES Act gu wuxuu saamaynayaa oo kaliya baarida COVID-19, ma saamaynayo booqasho kale ee dhakhtar.

- Qaar ka mid ah caymis bixiyaasha ayaa ogolaaday in bixiyaan kharashyada la xiriira baarida COVID-19 oo ay sameeyaan isbitaalada aan wada shaqaynta leenahay.
- **Waa muhiim in aad ka hubsatid caymiskaaga kharashka ay daboolayaan ama bixinayaan.**

**Caymis la'aan caafimaad:** Barnaamij dowlada ah ayaa bixin doona baarida COVID-19, lakiin ma aha booqashada xafiisaya.

#### Su'aalaha?

La xiriir caymiskaaga, ama Isbitaalka caruurta ee Minnesota kala xiriir halkaan [PatientCostEstimates@ChildrensMN.org](mailto:PatientCostEstimates@ChildrensMN.org) ama wac 952-992-5627 si ay kaaga caawinaan in aad fahantid kharashka hawlgalka ama booqashada.

#### Waxa la filayo maalinta qaliinka

- Laba waalidiin/mas'uul sharciyasan oo caafimaad qaba baa soo raaci kara maalinta qaliinka ilmaha.
- Haddii aad isaga baartay COVID-19 meel kale oo aan ahayn Isbitaalka Caruurta ee Minnesota:
  - Waa in aad keentaa nuqlu natijjada baariddii COVID-19. Ma aqbalayno jawaab afka nalooga sheego.



## COVID-19

- Weydii barta baarida in ay fakis ugu diraan natijada Isbitaalka Caruurta ee Minnesota qaybta qaliinka kahor inta aadan imaan (haddi ay suurta gal tahay)
  - **St. Paul:** 651-220-7220;
  - **Minneapolis:** 612-813-7704
- **Haddii lagaaga baaray COVID-19 barta suufmarinta Isbitaalka Caruurta ee Minnesota, Markaa waan haysanaa natiijooyinkii marka aad timaadid.**
- Tag Barta Soo Dhaweynta **Isbitaalka Caruuta ee Minnesota** marka aad timaadid maalinta qaliinka.
- Qof kasta oo yimaada Isbitaalka caruurta ee Minnesota waa in uu ku gudbaa baarida caafimaad qabka, oo ay ka mid tahay qandhada, astaamooyinka jirada.
- Qof kasta oo ka weyn 2 sano waa in uu xirtaa maaskaro marka uu joogo Isbitaalka Caruurta ee Minnesota. Haddii aadan wadan mid, waxaa ku siin doona Barta soo Dhaweynta Isbitaalka.

### Su'aalo?

Wixii su'aala ah, fadlan ka wac khadkayaga kalkaaliyada COVID-19 lambarkaan si laguu caawino: 952-99-COVID (952-99-26843).